



# Alaabooyinka Degdegga

Hay'adaha dawladdu waxay ka jawaabi doonaan masiibooyinka beesha ama komyuunitiga soo gaadha, laakiin waxa laga yaabaa in muwaadiniintu ay kaligood is dabaridaan mudo ah saacado, xiitaa maalmo, ka dib marka masiibo dhacdo. Waa inaad isu diyaarisid inaad daryeeshid naftaada iyo qoyskaaga ugu yaraan saddex maalmood. Marka ay jiraan xaalado degdeg, sida infiluwense faafay, waxa laga yaabaa inaad u baahan tahay inaad isu diyaarisid hal todobaad ama ka badan.

## Xidhmada badbaadista ee degdegga

Xidhmo ku kaydso guriga, shaqada iyo dugsiga ama xarunta sii-haynta ee ilmo kasta.

- Cunto qallalan ama qasac ku jirta iyo biyo cabitaan oo ah qof kasta
- Qasac fure
- Alaabooyinka gargaarka koowaad iyo buugga gargaarka koowaad
- Koobiyada dukumentiyada muhiimka ah: cadeymaha dhalashada, liisano iyo waraaqaha caymiska (insurance)
- Alaabta "baahiyaha gaarka ah" ee xubnaha qoyska, sida caanaha sabiga ama ilmaha yar, muraayadaha indhaha iyo dawooyin
- Bedlad ah dhar
- Boorsada seexashada ama buste
- Raadyo ama telefiskan ku shaqeeya baytari
- Toosh/karbuuno leh baytariyo dheeraad ah
- Siidhi/firimbi
- Kabriid/taraq aan biyo galin
- Alaabta ciyaarta, buugaag, hal-xidheyaal, ciyaaro
- Fureyaal guri iyo baabuur oo dheeraad ah
- Liiska magacyada iyo lambarada teleefonka ee cidda lala xidhiidhayo
- Cunto, biyo iyo alaabooyin loogu talagalay xayawaanka guriga

Alaab dheeraad ah oo aad ku kaydin kartid guriga si aad u isticmaashid xilliga degdegga:

## Alaabooyinka karinta

- Baarbikiyuu, shoolada miyiga
- Shidaalka karinta, sida dhuxul ama shidaalka shoolada miyiga
- Midiyo, fargeetooyin, qaadooyin ah balaastig
- Saxamo iyo koobab ah waraaq
- Waraaqaha masaxaadda
- Aluminiyamka duubista oo ah midka shaqada culus

## Alaabooyinka nadaafadda

- Bacaha qashinka oo waaweyn oo balaastig ah oo loogu talagalay qashinka, ka badbaadista biyaha
- Haamo qashin oo waaweyn
- Saabuunta adag iyo saabuunta hoore ah
- Shaambo
- Dawada/cajiinka ilkaha iyo burushyada ilkaha
- Alaabooyinka haweenka iyo ilmaha yaryar
- Waraaqaha musqusha
- Biliijka guriga oo aan wax lagu darin, iyo dhibciyaha isha (oo loogu talagalay saafi-gareynta biyaha la cabo)
- Wargeys ama joornaal — lagu duubo qashinka

## Raaxada

- Kabo adag
- Gacmo-galisyo marka la xaaqayo burburka
- Teendho

## Qalab

- Faash/gudin, majarafad/badiil, xaaqin
- Baanadda bisha u eg ee lagu xidho gaasta
- Iskuruudarayfar/kashawiito, kalbad/qabato, dubbe
- Duub xadhig oo ah nus inji
- Dhejis/sharooto balaastig ah iyo baco fidsan
- Midi ama sakiinno
- Tuubada beerta oo loogu talagalay in biyaha lagu nuugo/dhumiyo iyo in dabka lagula dagaalamo



PO Box 47890  
Olympia, WA 98504-7890

Bogga Internetka:  
[www.doh.wa.gov](http://www.doh.wa.gov)

360-236-4027  
(800) 525-0127

DOH Pub 821-003  
Somali